

## Caymiska Shaqo la'aanta (UI)

### ✓ LIISKA WARBIXINTA

- Codso sida ugu dhaqsida badan oo aad shaqo la'aan noqtotid. Shaqo raadi oo u diyaar garow inaad ogolaatid shaqada. Codso faa'idada lacag bixinta isbuuc walba illaa aad shaqada waqtii buuxo ugu laabatid.
- Xasuuso sirtaada oo gooni u haay.
- Ka jawaab dhammaan codsiyada warbixinta.
- Cusbooneysii cinwaanka akoonkaaga ugu yaraan afar sanno kadib codsiga ugu dambeeyo ee lacag bixinta faa'idada.
- Soo wac Adeega Macmiilka UI haddii aad su'aalo qabtid, Isniinta illaa Jimcaha, 8 A.M. illaa 4:30 P.M.

Aaga Magaalooinka

Mataanaha: . . . . . 651-296-3644

Minnesotada Weyn: . . . . . 1-877-898-9090

TTY – ee dadka dhegaha culus

ha so waco: . . . . . 1-866-814-1252

### Su'aalaha?

La hadal Wakiilka Adeega Macmiilka Isniinta illaa Jimcaha, 8 A.M. illaa 4:30 P.M.  
(Haddii aad u baahantahay luuqad aan ka aheyn Ingiriis, raac codka caawinta si aad ula hadashid wakiil oo aad u codsatid turjubaan.)

Aaga Magaalooinka Mataanaha: . . . 651-296-3644

Minnesotada Weyn: . . . . . 1-877-898-9090

TTY – ee dadka dhegaha culus

ha so waco: . . . . . 1-866-814-1252



Esta información está disponible en español en el internet en:  
[uimn.org/uimn/images/Spanish\\_UI\\_Brochure\\_How\\_To\\_Apply.pdf](http://uimn.org/uimn/images/Spanish_UI_Brochure_How_To_Apply.pdf) o llamando al siguiente número.

Muaj cov kev qhia no sau ua Lus Hmoob nyob rau (hauv internet)  
saum huab saum cua: [uimn.org/uimn/images/Hmong\\_UI\\_Brochure\\_How\\_To\\_Apply.pdf](http://uimn.org/uimn/images/Hmong_UI_Brochure_How_To_Apply.pdf) los yog hu rau tus xov tooj nram no.

Macluumaaadkaan waxaa lagu helaya af- Soomaali ayadoo  
internetka laga galo: [uimn.org/uimn/images/Somali\\_UI\\_Brochure\\_How\\_To\\_Apply.pdf](http://uimn.org/uimn/images/Somali_UI_Brochure_How_To_Apply.pdf) ama la soo waco lambarka  
telefoonka hoose.

Warbixintaan waxaa loogu heli karaa qaab kale shaqsiyaadka qaba  
curyannimada adiga oo soo wacayo 651-259-7223.

### SIDA LOO CODSADO

# FAA'IDOOYINKA CAYMISKA SHAQO LA'AANTA



Wixii warbixin dheeraad ah, booqo websaydkeena

**uimn.org**

**mn** MINNESOTA  
UNEMPLOYMENT INSURANCE

**mn** MINNESOTA  
UNEMPLOYMENT INSURANCE

Welcome to the Minnesota Unemployment Insurance (UI) Program  
This is the official website of the Minnesota Unemployment Insurance Program, administered by the Department of Employment and Economic Development (DEED).

Select who you are:

**APPLICANTS >>** **EMPLOYERS & AGENTS >>**

Español Hmoob Somali

### Warbixintaan Guud

Booqo onleenka [www.uimn.org](http://www.uimn.org) wixii warbixin guud ee ku saabsan faa'idooyinka caymiska shaqo la'aanta.

### Minnesota Unemployment Insurance Program

P.O. Box 4629  
St. Paul, MN 55101-4629

# Sida loo codsadoto Faa'idooyinka Caymiska Shaqo la'aanta

## Ma in aad codsatid faa'idooyinka shaqo la'aanta?

YWaa in aad codsataa haddii aad hadeer lumisay shaqo ama saacadahaaga hoos u dhaceen. Codsiga ayaan u isticmaalha go'anka in aad u qalantid faa'idooyinka. **Codso sida ugu dhaqsida badan oo aad shaqo la'aan noqotid.** Ha sugin si aad u codsatid ama waxaa lumin kartaa faa'idooyinka qaar.

## DIYAAR GAROW!

Waxaan u baahannahay warbixinta xigta marka aad codsaneysid:

- Lambarka Amniga Bulshada
- Lambarka shatiga darawalka ama lambar kale aqoonsiga kasocda dowlada
- Taariiqda shaqa qabadka ee 18 bilood ee la soo dhaafay, oo ay ku jiraan:
  - Magaca badrooni walba, ciwaanka, iyo lambarka taleefonka
  - Taariiqaha shaqada (visha iyo sannadka)
  - Qiimaha lacag bixinta
  - Sababta aadan markale ugu shaqeynin badrooniga
- Akoonka bangigaaga iyo lambarada isdaba ah haddii aad rabtid dabaaji toos ah
- Haddii aadan hayen muwaadin Mareykan ahwaxaad u baahantahay waraaqaha ogolaanshaha shaqadaada
- Haddii aad u dageegtay milatariga Mareykanka 18-kii bilood ee la soo dhaafay waxaad u baahantahay DD-214, Xubinaha 4
- Haddii aad aheyd shaqaalaha faderaalka 18-kii bilood ee la soo dhaafay waxaad u baahantahay SF-8 iyo SF-50

Onleenka ama taleefon  
ahaan Isniinta illaa Jimca-  
ha, 6 A.M. illaa 6 P.M.



## ONLEENKA

- 1 Booqo [www.uimn.org](http://www.uimn.org) dooro **Applicants** (Codsadaha) iyo kadib **Apply for Benefits** (Codso Faa'idooyinka).
- 2 Geli warbixinta la codsaday.
- 3 Dhammaadka codsiga, waxaa kuu suurtogaleyso inaad eegtid warbixintaada oo sameeyo isbadelada ka hor inta aadan xareynin codsigaaga.
- 4 Dooro **Submit the Unemployment Benefit Application** (Gudbi Codsga Faa'idaada Shaqo la'aanta).
- 5 Bogga xaqijintaa way muuqaneysaa iyada oo tusineyo inaad si guul ah u xareysay codsiga.



## TALEEFONKA TOOSKA AH

oo lagu heli karo af Ingiriis, Isbaanish, Homong, ama Soomaali

Soo wac mid ka mid ah lambarada taleefonka xigga:  
Aaga Magaalooinka Mataanaha: 651-296-3644  
Minnesotada Weyn: . . . . . 1-877-898-9090  
TTY – ee dadka dhigaha culus ha so waco: . . . . .  
1-866-814-1252

- 1 Sameey dooqa luuqadaada: riix 1 oo Ingiriis, 2 oo Isbaanish, 3 oo Homong, ama 4 oo Soomaali.  
(Haddii aad u baahantahay luuqad kale, riix 1 oo raac codka caawinta si aad ula hadashid wakiil oo aad u codsatid turjubaan.)
- 2 Geli lambarkaaga Amniga Bulshada iyo dooro **Apply for Benefits** (Codsga Faa'idooyinka).
- 3 Geli warbixinta lagu codsaday badhamada taleefonka.
- 4 Waxaad dhameyneysaa codsigaaga adiga oo la hadlayso wakiilkha adeega macmiilkha.

## Kadib markaad codsatid . . .

Maxaan fillan karaa kadib markaan gudbiyo codsiga faa'idooyinka?

Kadib markaad codsatid, waxaad boostada ku heleysaa:

- Tilmaamaha ee sida iyo goorta la Codsado Lacagbixinada Faa'idooyinka
- Warbixinta Buugga iyo tilmaamaha iyo jawaabaha ee kuwa badan ee su'aalahaaga-sidoo kale waxaa laga heli karaa onleenka [www.uimn.org](http://www.uimn.org)
- Go'aaminta Akoonka Faa'idooyinka ee muujinay o dakhliga faa'idaadaa isbuuclaha iyo dakhligaaga guud ee faa'idooyinka, haddii aad u qalantid

Haddii aan u qalmo faa'idooyinka, imisa ayaan helayaa?

Tirada faa'idaadaa isbuuclaha waxay ahaaneysaa qiyaastii boqolkiiba 50 ee iskucelceliskaaga mushaarka isbuuclaha, oo illaa ugu badnaan gobolka.

Si aad u heshid faa'idaada lacag bixinta, miyaan u baahannahay inaan sameeyo wax marka laga reebo codsiga?

Haa. Waa inaad sameysay codsiga lacag bixinta faa'idaada isbuuc-walba onleenka ama teleefon ahaan. Marka aad sameysid codsigaaga isbuuclaha, waxaan ku weydiineynaa in aad naga soo wargeliso dakhli kasta, haddii aad u diyaar tahay inaad ogolaatid shaqada, iyo haddii aad raadineyso shaqo.

Haddii aan u qalmo, goorma ayaan helayaa lacag bixinteyda koowaad?

Horaanta aad heli laheyd lacag bixinta qiyaastii waa sadex isbuuc kadib markaad codsatid. Sharciga wuxuu dhigayaa inu qof walba leeyahay isbuuc aan la magin inta faa'idaada aan la siinin. Tani waa isbuuc koowaad ee aad codsatid oo aad u qlaantid lacag bixinta. Isbuucaan la magin marnaba lama bixiyo.

